



Mic-Key® – Gastrostomy button Isticmaalkiisa iyo dhaqaalayntiisa

The Mic-Key® Gastrostomy Button waa shay fudud, yar oo sidii la rabo loo maamulan karo kaasoo loo isticmaalo si aan dhiblahayn siinta/qaadashada nafaqada, dareeraha iyo daawooyinkaba marka ay jiraan dhibaatooyin xagga liqitaanka ah. Nolasha caadigacah marka aad isticmaalayo Mic-Key® wax yar ayaa iska bedela waxaana uu qalabku leeyahay marin hal dhinac wax u wada (valve) oo ka celiya waxii la liqay inay dib u soo laabtaan kaasoo ay hayso bac ay hawo ku jirto (balloon).


Isticmaalid/maamulid/raashin

Si aadan u lalaboon, waxaa lagula talinayaa, inaad fariisato ama aad meel ku tiirsato. Hubi in raashinka/tuubada waqtiga quudashada uu heer-kulkooda la mid yahay kan guriga.

Isku xiritaanka iyo kala furista qaybta xiriirinta,

Isku aadi xarriiqimaha madoow, gudaha u riix, wareeji wareeg rubac (quarter) ama seddex rubac (three quarters) ah, marka aad kala furayso dib u wareeji isla masaafadii oo kale kadibna kala bixina kolka ay xarriiqimaha madoow isku aadan yihiin.

Biyo 10 illaa 20 ml raacsii qaybta xiriirinta ee Mic-Key® inta ka horaysa ama ka dambaysa isticmaalidiisa. Tuubada wax isku xiraysa waa hal isticmaal/ hal qof, haddii ay dhacdo in dhowr jeer la isticmaalo waxaa muhiim ah in si fiican loo nadiifiyo, laguna hayo qaboojiye isla markaana lagu bedelo 2 illaa 7 maalmood.



Dhaqaalaynta guud

Dhaq islamarkaana qalaji agagaarka galuuska (button) taasoo qayb ka ah nadaafadaada maalin walba.

Inaan qubaysato , sixniga qubayska qubays u gasho amaba aad dabaal aado waa wax aad suurtogal u ah. Ilaali nadaafada qalabkan raashinka sida dhaqaalayntiisa iyo ku quudashadiisaba, habkan ma aha hab aan waxba jeermis ah keenayn (sterile procedure).

Dhaqaalaynta Mic-Key®

Wareeji Mic-Key® waqtiga aad nadiifinayso maalin walba.

Haddii aan Mic-Key® la isticmaalin, maalin walba biyo ku dhaq.

Hubi biyona ku shub ama ku bedel bacda iyo katiinadaba (cuff) usbuucii mar, tusaale ahaan maalin walba oo Isniin ah.

Shaygan Mic-Key® ee guriga yaala waa la bedeli karaa waana in la badelaa labadii ama seddexdii biloodba mar, markaaso marinka celiya raashinka dib-u-soo noqoshadiisa uu daciiifay.

Hadii Mic-Key® uu kala fuqo

Qaado mid cusub sida ugu dhaqsaha badanna u geli. Hadii aadan haysan Mic-Key® cusub, midkii hore soo qaad. Dhaq, geli oo si fiican ugu xir sharootaan wasaq iyo jeermis lahayn ama wax la mid ah.

Waxaa aad muhiim u ah in meesha furan (stoma) ay ahaato tu furan – la xiriir kalkalisada caafimaad/dhakhtarka sida ugu dhakhsaha badan si aad u hesho Mic-Key® cusub.

Haddii aad dareento xasilooni daro (discomfort) amaba xanuun kaasoo la xiriira isticmaalka/raashinka, la xiriir kalkalisada caafimaad ama dhakhtarka.

Waxii akhbaar dheeraad ah, ee bogga Mic-Key's!
www.mic-key.nu